UNHCR
The UN Refugee Agency

# CAAWIMADA LASIIYO DADKA QAXOOTIYASHA IYO MAGANGALYO DOONKA AH EE KUNOOL LIBYA

2023

# HORDHAC

## WAA MAXAY UNHCR?

Wakiilka saree e hay'ada qaramada midoobe ee qaxootiyasha (UNHCR) ayaa ah hay'ada u xilsaran ineey ilaalo iyo caawitaan siiyo dadka qaxootiyasha iyo kuwa magangalyo doonka ah. Qofka qaxootiga ah waa qof lagu qasbay inuu kasoo cararo wadankiisa cabsi owgeed. Qofka qaxootiga ahna kuma laaban karo wadankiisa hooyo cabsi owgeed. Qofka markuu iska diiwangaliyo UNHCR waxaa loo tixgaliyaa inuu yahay qof magangalyo doon ah ilaa ay UNHCR u aqoonsato qof qaxooti ah oo cabashadiisa la qiimeeyo.

## DHAMAN CAWIMADKA IYO ILAALADA WAA MID BILAASH AH

Fadlan ka digtoonow in aan lagaga baahneed wax lacag ah inaad bixiso ama aad aqbasho wax cawimad ah, (oo ay kamid yihin lacag, cunto, mise waxyaabo kale) ee UNHCR iyo hawl'wadagayasheeda.

Caawimadkan waa MID BILAASH AH LACAG LAGAA RABIN. Hakabaqin inaad usoo wargalisaa UNHCR xad gudub kasto.

**UJEEDADA BUUGYARAHAN**
Buug yarahan wuxuu bixinayaa aqbarad kusabsan cawimaadka lasiiyo dadka qaxootiga iyo magan galyo doonka ah.

# CIWAAKA

## QAABKA LOOLA XIRIIRO UNHCR?

UNHCR waxay sisaa dada qaxootiyasha iyo magangalyo doonka ah ilaalin oo ay kamidyihiin diwaangalin, iyo caawimaad kasto oo lay bixinayso dawlada Libya iyo hawlwadagayasheda.

Hadii aad rabto inaad waydiiso wax sualo UNHCR ama caawitaan u bahato waxaad wici kartaa xarunta wicitaanka ee Tawasul 1404 ama qadka leenleen ka ee UNHCR. Tawasul waa qad bilaash ah dhamaan wadanka guduhiisa.

Xarunta qadka wicitaanka ee | CFM 1404
*Sacadaha shaqada: axada- qamiista 9AM ilaa 11PM*

lbytr@unhcr.org

@UNHCRLibyaInfo

@UNHCRTripoli

@UNHCRLibya

https://help.unhcr.org/libya

## QADKA CAWIMADKA EE UNHCR

UNHCR ta Libya ee diwaangalin
091 163 3466 8:30 - 16:30 Axada-Qamiista

Qeebta caawitanka ilaalada ee Tripoli (qeebta magalada)
091 712 7644 8:30 - 16:30 Axada-Qamiista

Qeebta caawitanka ilaalada ee Benghazi
091 000 7218 8:30 - 16:30 Axada-Qamiista

# DIWANGALINTA

## SABABTA MAXAA WEEYO ISKAGA DIWANGALINYO UNHCR?

Hadii aadan wadankada ugu labadan Karin sababo laxiriiro cabsi owgeed ood u baqayso noolashada iyo amaankada, oo ad raadinayso ilaalin calami ah, waainaad kowda ugu horeeso iska diwangalisaa UNHCR. Marka lagu diwangaliyo UNHCR waxay diwangalinaysaa maclumadkada adiga iyo qawskada iyo sababta kugu kaliftay inaad kasoo tagto wadankaaga. Isdiwaangalinta UNHCR waa qodobka ugu horeeyo oo aad ku raadsanayso ilaalin iyo caawimaad qaxootinimo ama magangalyo doon. Dhamaan dadka la diiwangaliyey waxay UNHCR siinaysaa shahaado magangalyo, taas oo tusiinayso ka diwangalshanya Libya.

**Isdiwangalintu isla markiibu kuuma ogolaanayso ninaad hesho dib-udajin ama in lagu geeyo wadan ka baxsan Libya.**

## WA MAXAY WAREESIGA DIIWANGALINTA?

Wareesiga diiwangalinta waa wareesi ay UNHCR qaadayso oo ay ku uruurinayso aqbaarad kusaabsan nafsadada oo ay ka mid yihin magacada, Meesha aad kudhalatay, waqtiga aad dhalatay, Meesha aad ku dhalatay, sanadkada, sababta aad wadankada ugu laaban Karin, iyo caawimaad ka gaar, iyo wixii kaloo aqbaarad kale.

Dhamaan wareesiyada UNHCR waa muhiim inaad la sheegtaa, aqbaardaka buuxo ee sax ah, inta aad aqoon uleedahay. Hadii aadan bixin aqbaarta saxda oo dhameestiran waxay carqabad ku noqonaysaa in UNHCR ilaalin iyo caawimaad kusiiyo mustaqbalka.

Fadlan ogoow dhamaan aqbaraad aad UNHCR la wadaagto ineey tahay mid sir ah, mana lala wadaagi dooni dad aysan kuquseen fasaxaada la'aantiis.

### WARAYSIGA DIIWANGALINTU WAA LOOBAHANYA HADII

- Adan mar hore iska diiwangalin UNHCR.
- Hadaa rabtid inaad badashid heerka qooskada tusale hadaa rabtid in aad kudartid ama ka jartid qof qooskada katursan keeskada.
- Hadii warqadahada ay dhacaan oo ay u bahanyihin in la cusbonsiiyo.

# DIWANGALINTA

## DIWAANGALINTA BALANTA ISDIWANGALINTA

Si aad balan diwangalin u sameesato, fadlan la xiriir **QADKA UNHCR EE DIWANGALINTA**

**091 163 3466**

Shaqalaha diwaangalinta ayaa kusiin doono war dheeri ah oo kusaabsan bug yaraha diwaangalinta. Waxana lagu siin doonaa balan.

## XARUNTA DIWAANGALINTA EE UNHCR




**Xarunta diwangalinta UNHCR**

Sahel jidka Al Jfara, oo u dhaw EL Mashtal, Sarraj Tripoli

**Dhamaan caawimaadka UNHCR ee xarunta diiwangalinta balan lee loo qadan karaa.**

KADIGTOONOW AQBARADKA MARIN HABAABINTA AH

# DIWANGALINTA

## DIWAANGALINTA CUSUBAN

Malinta balantada diwaangalinta, fadlan la imoow dhamaan xubnaha qooskada iyo dhamaan warqadahada oo ay kamid yihin kuwa xitaa koobiga ah hadii ay macquul tahay. Kuwaas waxaa kamid ah baasaborka, kaarka dhalashada, warqada dhalashada, warqada shaqada, shahadada guurka/tan furniinka, tan wax barashada, ama warqadaha UNHCR mid qaxooti mise mid magangalyo doonbo oo lagaa siiyey meelo kalo oo cadeenayo aqonsigada.

La imoow dhamaan warqadaha aad heesato. Waad iska diwangalin kartaa UNHCR hadii aad heesan xitaa wax warqadahaas ah.

## SI AAD U BADASHO XUBNAHA QAWSKADA EE KEESKADA UNHCR

A Markaad qadato balan, hooyada ama aabaha waaineey imadan xafiiska UNHCR canugana waain la imadan iyo dhamaan warqadaha:

1. Warqada dhalashada oo original ah oo u ku dhaganya shaambada isbitaalka, ama warqada isbitaalka lagaga saaray.
2. Warqada guurka/furniinka/dhimashada.

### UNHCR WAY KUSOO CELIN DOONTAA DHAMAAN WARQADAHADA ISLA MARKIIBO

- Kadigtoonow dadka isku tilmaamayo ineey UNHCR yihin ama hay'adaha kuwaas oo kuwaydinayo aqoonsigaada si ay kuu caawiyaan. Aqoonsigada adaa iskaleh, UNHCR natus ineey kudhahdo maoyanee mahesanayso warqadahada.
- Hadii aad kashakiso inaad siisay aqoonsigada qof shaqsi ah ama hay'ad, fadlan soo wargali UNHCR.

# ILAALINTA IYO CAAWIMAADKA

## 1. ILAALINTA

CESVI

**Maclumaadka xirirka**
092 276 7166

**Cabashada**
092 470 1185

CESVI waxay bixisaa cawimaad dhanka ilalada oo ay ka midyihin latalin dadka xadgudubka, ilmaha waaridkood lasocon, iyo kuwa waaridkood kala lumeen, and caawimaadka qaxootiyasha said u dhiban.




**CDC**
Al-Nasr/Sreem St, kasoo horjeedka talefishinka qaranka ee, Tripoli

## WAXBARASHADA

unicef

**Maclumaadka xirirka**
@UNICEF.Libya

UNHCR waxay sitoos oola shaqeesaa UNICEF si ay or ugu qaado tayada waxbarashada ee caruurta qaxootiga ah, iyo ilaalinta caruurta qaxootiyasha iyo magangalyo doonka.

La hawl wadagayasha UNICEF waxay xarumo kaladuwan kuleeyihin Libya halkaas oo lagu ilaaliyo amaanka caruurta, waxbarashadooda, iyo maamulkooda iyo siisinta waxbarashad aan rasmiga aheen.

Hawlaha maamulka ee kiiska ee shaqsi kasto oo loosoo gudbiyo caawimaad macquul ah. Si aad u hesho cawimaadkaas, fadlan laxiriir UNHCR ama CESVI qadka caawimaadka si add u hesho aqbaraad dheeri ah.

## BAAFINTA QAWSKA

ICRC

**Gudiga caalamiga ah ee laqeerta cas (ICRC)**

ICRC ayaa sameeso baafinta qawska ee shaqsi kasta oo ay ka lumeen xiriirka qoosaskooda.

**Maclumaadka xirirka**
Tripoli: 092 231 5986
Benghazi: 091 035 0290
@ICRC

# ILAALINTA IYO CAAWIMAADKA

## 2. CAAWIMAADKA

CESVI

CESVI waxay siisaa qaxootiyasha iyo magangalyo doonta caawimaad lacageed taas oo ka kaafinayso baahidooda. Inaad u qalanto caawamaadka lacageed waxay ku qadanaysaa tixgalin dheeri ah (oo ay kamid tahay dadka said u liito).

CESVI waxay caawimaad u fidinaysaa dadka baahida gaarka ah qabo oo ay kamid yihin dadka naafada ah oo lasiinayo qalab/ ama sitoos losoo gudbiyey, lanasiinayo caawimaad cilmi nafsi, baxnaaninta jirka, iyo gurigoo lagu booqo kuwa aan awoodin in ay imadaan xarunta maalinlaha ah.

**Maclumaadka xirirka**

091 002 7716

092 276 7166

**Cabashada**

092 470 1185

INTERNATIONAL RESCUE COMMITTEE

IRC waxay qeebisaa maclumaadka aan cuntada aheen (NFIs). NFIs waxaa ka mid ah qalabka nadaafada, shay'yasha gargaarka asaasiga ah, iyo alabo kale oo ka cawinayo hiliga jilaalka ha. Inaad u qalanto caawamaadka NFI waxay ku qadanaysaa tixgalin dheeri ah (oo ay kamid tahay dadka said u liito).

NRC NORWEGIAN REFUGEE COUNCIL

NRC waxay qaxootiyasha iyo maagangalyo doonka siisaa karar lacageed oo ay dadka kuisticmaali karan dukaamayso taas oo kamid ah cawimaadka lacageed. Inaad u qalanto caawamaadka NFI waxay ku qadanaysaa tixgalin dheeri ah (oo ay kamid tahay dadka said u liito).

# ILAALINTA IYO CAAWIMAADKA

## 3. ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO CAAWIMAADDA NAFSIGA AH

### ADEEGYADA

INTERNATIONAL RESCUE COMMITTEE

Hay'adda IRC waxaa ay adeegyo kala duwan siisaa dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-gelyo-doonka ah, waxaana adeegyadaasi ka mid ah kuwa laga bixyo xarunta Community Day Center-ka iyo waliba goobo caafimaad oo bixiya daryeel aasaasi ah.

**Maclumaadka xirirka**

La talin guud:
091 034 7365

Caafimaadka Taranka iyo Uurka:
091 035 4818

Gargaar degdeg ah:
091 035 4839 24/7

### CAAWIMAADDA NAFSIGA AH

cesvi

CESVI waxaa ay daryeel caafimaad oo nafsi ah iyo mid maskaxeedba siisaa dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-gelyo-doonka ah ee u baahan taageero nafsi ah.

**Maclumaadka xirirka**

091 002 7716
092 276 7166

INTERNATIONAL RESCUE COMMITTEE

Hay'adda IRC waxaa ay bixisaa adeegyo caafimaad oo nafsi ah iyo kuwo maskaxeedba, waxaana adeegyadaasi ka mid ah la talinno nafsi ah.

**Maclumaadka xirirka**

La talin guud:
091 034 7365

Gargaar degdeg ah:
091 035 4839 24/7

# DIB-U-DAJINTA IYO DAAD-GURAYNTA

Dib-u-dajin waxaa lagawadaa in dadka u baahan badbaado caalami ah, looga wado, si ikhtiyaari ah, halka ay maganta/qaxootiga ku yihiin, isla markaana ay yihihiin dad u diiwaan-gashan UNHCR ama dowladda martida u yihiin, iyadoo la geynayo dal kale, oo ah dal aqbalay in uu qaato dadkaasi qaxootiga ah.

Liibiya, UNHCR waxaa ay bixisaa dib-u-dajin dal saddexaad ah halkaas oo ay dadka qaxootiga ahi ay rasmi ah u degi doonaan. Hay'addu waxaa ay sidoo kale dadka u daad-guraysaa xarumo ku-meel-gaar ah, halkaasi oo ay joogi doonaan ilaa looga helo xal waara ama xal bani'aadanimo oo kale. Dalalka dib-u-dajinta sameeya waxaa ay sanad kastaa bixyaan tiro kooban oo dib-u-dajin ah, kaliya dad tiro yar oo qaxooti ah ayaana dib-u-dajin loo sameeyaa. Sanad kastaa, boqolkiiba hal dadka qaxootiga ah ayaa hela dib-u-dajin.

- Dib-u-dajinta iyo Daad-gurayntu ma aha xaquuq, mana jirto codsi la dirsan karo si dib-u-dajin ama daadgurayn loo helo.
- UNHCR waxaa ay, si nimaad iyo habraac leh, dadka qaxootiga ah ugu doortaa xal waara iyadoo dhanka kalena la ilaalinayo badbaadadooda. Maadaama fursaduhu ay xadidan yihiin, UNHCR waxaa ay ahmiyad siinaysaa dadka qaxootiga ah ee nugul, isla markaana qaba baahiyo badbaado/xaq-dhowr oo degdeg ah.
- In qofku xaalad adag ku sugan yahay (nugulaansho), damaanad uma aha in qofka qaxootiga ahi uu u qalmo/helo xal waara.
- In qoysku midoobo waa arrin muhiim u ah UNHCR, hadii aad doonayso in aad dib ula midowdo xubno qoyskaaga ah, fadlan soo wargeli UNHCR adigoo soo wacaya khadka furan/taleefanada hay'adda.

**Hadii UNHCR ay kuu qorshayso waraysi, waa lagu soo wici doonaa, waxaana lagu qaban doonaa ballan.**

## DIB-U-DAJINTA IYO DAAD-GURAYNTU WAA LACAG LA'AAN

Qofkii lacag idin waydiista ama idiin samaynaya ballan ah in uu idinka caawin doono dib-u-dajin ama daad-gurayn, waa fal musuq ah oo tuugnimo ah. Ha aaminin qofkii idin dhahaa ama idiin sheego in ay idinka caawin karaan dib-u-dajin ama daad-gurayn hadii aad lacag bixisaan.

# DIB-U-DAJINTA IYO DAAD-GURAYNTA

## MAALINTA WARAYSIGA LAGAA QAADAYO,

- Waa in aad keentaa caddaymo/waraaqo quseeyo kiiskaaga.
- Waa in aad UNHCR wargelisaa hadii jiraan dad qoyskaaga ka mid ah oo kula jooga/wehliya. Dadka qaan-gaarka ah ee qoyska ka midka ah, si gaar ah ayaa waraysi looga qaadi doonaa.
- Runta sheeg, wixii lagu waydiiyana ka jawaab (noqo qof wada-shaqayn le).

## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY

- In lagugu waraysto luuqadda aad ku hadasho.
- In uu ku matalo qareen ama wakil sharci oo buuxiyay shuruudaha waafaqsan habraacyada UNHCR.

## SIDOO KALE, FADLAN KA TAXADDAR OO OGSOONOOW

- In qof kastaaba ay sheekadiisa ay gaar tahay, iyo waliba sababaha dalkiisa ka soo qixiyay. Haddaba, kiis walba waxaa loo qiimayn doonaa si gaar ah, si waafaqsan shuruucda iyo habraacyada UNHCR.
- Mararka qaar, xan iyo ku tiro-ku-teen ayaa la faafiyaa, oo ku saabsan waxa ay tahay in aad sheegtid marka lagu waraysanayo si qaxootinimo laguugu aqoonsado. Taasi waa arrin been ah, waana in aad iska diidaan oo aydan aqbalin.
- In aad been sheegto oo aad marin habaabiso UNHCR, isla markaana aad been ka sheegto dhacdooyinka kiiskaaga, waa arrin dambi ah. Ogsoonow in arrintaasi ay saamayn xun kugu yeelanayso, waxaana ay UNHCR ku khasbi doontaa in kiiskaaga aysan wax tixgalin ah siin.
- Wax kaste oo aad sheegtid iyo dukumentiyadaadaba waa sir aad loo xifidn/ilaanin doono, mana dhici doonta in lala wadaago cid aan UNHCR ahayn adigoo oo aanan oggolaansho bixin. Fadlan ogsoonoow, in sinnaba aysan u dhici Karin, in xogtaada lala wadaago dowladda dalkaaga/ waddanka aad assal ahaantaada ka timid.

# DIB-UGU-NOQOSHADA DALKAAGII HOOYO

- Haddii aad doonayso macluumaad ku saabsan [suuragalnimada ah] in dalkaagii aad dib ugu noqoto, UNHCR iyo/ama IOM ayaa waano iyo warbixinba ku siin kara.
- UNHCR waxaa ka go'an xaqiijinta in xaaladaha ku geedaaman dib ugu noqoshada dalkaaga ay ku dhacdi si sharaf iyo amni leh. UNHCR waxaa laga yaabaa in ay ku siiso warbixin ku saabsan xaaladaha dalkaaga uu marayo, si aad go'aan iskaa ah u gaarto.
- Sida marar badan dhacdayba, UNHCR, IOM iyo hay'ado kale waxaa ay dabari karaan kharashaadka safarkaaga, waxaana sidoo kale ku siin karaan kaalmo lacageed iyo caawimaado kaleba marka aad dalkaagii ka degto.
- Hadii aad danaynayso macluumaad ku saabsan sidii aad dalkaagii ugu noqon lahayd, fadlan la xiriir UNHCR, waxaa lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan dalkaga iyo halka aad doonayso in aad dib ugu noqoto, waxaana la bilaabi doonaa habraacii aad dalkaaga dib ugu noqon lahayd.

# HABRAACYADA CABASHADA IYO DACWAYNTA FALALKA MUSUQA AH

UNHCR iyo dhammaan hay'adaha la shaqeeya waxaa ka go'an abuurista jawi ammaan ah oo ay dadku ku heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin. Waxaa jirta siyaasad ay hay'aduhu wada qabaan oo ah in aanan sinnaba loogu dulqaadan Karin dhammaan noocyada kala duwan ee dhaqan-xumida ah. Hadii aad la kulantay fal dhaqan xumo ah/anshax xumo ah, waxaad xaq u leedahay in aad dacwayso.

## WAA MAXAY DHAQAN-XUMO/ANSHAX XUMO

Qaramada Midoobay waxaa ay dhaqan-xumo ku qeexdaa, "fal kaste oo qof shaqaale ahi ku kaco, taasi oo liddi ku ah anshaxa shaqo ee qofka shaqaalaha ahi laga rabo, si waafaqsan xeerarka qaramada midoobay, habraacyada shaqaalaha iyo shuruucda shaqaalaha ama xeerar kale ee maamul, kuwaasi oo dhammaantoodba faraya qofka shaqaalaha ahi in uu ilaaliyo anshaxa shaqo ee laga rabo qofka shaqaalahaa ahi".

Waxyaabaha anshax/dhaqan xumida ah waxaa ka mid ah:

- In galmo ahaa qof looga faa'iidaysto ama tacaddi galmo loo gaysto qof ka mid ah dadka ay UNHCR u adeegto
- Khiyaano
- Musuqmaasuq
- Xatooyo ama wax-is-daba-marin
- Ku-takri-fal-awoodeed
- Gacan-ka-hadal ama handadaad/hanjabaad loo geysto dadka kale
- U hoggaansamid la'aanta shuruucda dalka

## KA FEEJIGNOOW KHIYAANADA

Dhammaan adeegyada UNHCR waa lacag la'aan. Ha aaminin qofkii ku yiraahda lacag bixi si aad u hesho adeeyada UNHCR iyo hay'adaha la shaqeeya. Hadii lacag lagu waydiiyo ama galmo lagu waydiisto ama asxaan kaleba lagaa codsado, fadlan arrintaasi ku soo dacwee oo si degdeg ah ugu soo sheeg UNHCR.

Dadkaasi falalka khiyaanada ahi wado, waa ay kuu imaan karaan, si shakhsi ama baraha bulshada ayay kaala soo xiriiri karaan ama idin kala soo hadli karaan sida Facebook, Youtube, WhatsApp, Viber, Telegram ama meel kaleba. Dadkaasi waxaa ay iska dhigayaan in ay UNHCR la shaqeeyaan, waxaana ku ballan qaadayaan dib-u-dajin ama in ay kaalmo lacageed ku siinayaan, ama in ay ku siinayaan waraaqo been abuur ah si lacag kaaga helaan ama asxaan galmo ay kaaga helaan.

# HABRAACYADA CABASHADA IYO DACWAYNTA FALALKA MUSUQA AH

## SIDEE AYAAD DACWAD U GUDBIN KARTAA

Si aad u dacwayso fal khiyaano ah, tacaddi ama ka faa'iidaysi galmo, ama fal kale oo dhaqan xumo ah oo ay ku kacaan shaqaalaha UNHCR, kuwa hay'adaha kale, ama qandaraaslayaashaba, fadlan soo dacwee oo dacwadaada ku soo hagaaji sida soo socota:

**XAFIISKA IGO**

**(XARUNA WAYN EE UNHCR)**

**1.** Si toos ah ugu dir xafiiska dambi baaraha ee xarunta way nee UNHCR ee Jeneefa, Iswiisarlaan.

Xafiiska Dambi-baaraha ee UNHCR:
94 rue de Montbrillant, CP 2500,
1211 Geneva

inspector@unhcr.org
(iimeel sir ah)

+41 22 739 7380
(Fakis/boosto sir ah)

www.unhcr.org/igo-complaints.html

**UNHCR LIBYA**

**2.** Waxaad adeegsan kartaa santuuqyada cabashada ee yaalla xarunta diiwaan-gelinta, ama email ahaanba ugu dir UNHCR Liibiya.

*Cabashadaada oo baqshad ku jirta, afkana ka xiran, ku rid santuuqa.*

Xarunta Diiwaan-gelinta:
Sahel Al Jfara Road, close to
El Mashtal Square, Tripoli

lbytrcompbox@unhcr.org

**Ogeysiis muhiim ah inta aadan dirin cabashadaada:** Xafiiska Dacwad oogaha wax awood ah uma alaha in uu wax ka qabto codsiyada quseeya kaalmooyinka iyo adeeyada hay'adda. Tani waxaa ay ka dhigan tahay in xafiiska dambi baaraha uusan dib-u-eegis ku samaynaynin kiisaska qaxootinimada ah, in aysan sidoo kale shuqul ku lahayn bixinta kaalmooyin lacageed ama deeq kaleba, sidoo kale shaqadooda ma aha in dadka qaxootiga ah ay xal waara oo kiiskooda ku saabsan u soo bandhigaan.

**Waxyaabaha quseeya arrimahaasi, fadlan kala xiriira xafiiska UNHCR ee Liibiya:**

**lbytrcompbox@unhcr.org**

# HABRAACYADA CABASHADA IYO DACWAYNTA FALALKA MUSUQA AH

## WAXYAABAHA AY TAHAY IN AAD DACWADDAADA KU DARTID

Hadii aad aragtay ama adiga ay ku qabsatay falal dhaqan xumo ahi, ayna geysteen shaqaalaha UNHCR, turjumaanada, ama waardiyayaasha, ama aad dareentay in eex lagula kacay, waxaad xaq u leedahay in aad dacwootid.

- Foomamka cabashada iyo sanaadiiqdaba waxaa ay yaallaan dhamaan xafiisyada UNHCR iyo waliba xarunta diiwaangelinta.
- Cabashadaadu waa in ay ka koobnaataa macluumaadka soo socda: magaca iyo meesha laga heli karo qofka dacwadda gudbinaya, taariikhda aad gudbinayso dacwadda, iyo waxa ay dacwaddu ku saabsan tahay.
- Foomka dacwadda ku or magacaaga iyo taleefan nambarkaaga ama siyaabaha kale ee laguula soo xiriiri karo.
- In aan ogaanno magacyada iyo meelaha lagala soo xiriiri karo dadka dacawadda gudbinaya iyo dhibanayaasha waxaa ay muhiim u tahay in dacwadda la furo oo la sii daba-galo. Sidoo kale, waxaa si qarsoodi ah (oo aadan wax magac ah qoraynin) u gudbin kartaa dacwad, waa haddii aadan rabin ama aada jeclaysan in aad magacaaga qorto.
- Qor magaca, xilka ama shaqada qofka, ama faahfaahin ku saabsan sida uu u eg yahay qofka shaqaalaha ah ee aad dacwaynaysid, ama turjumaanka aad dacwaynaysid, sidoo kale maalinta ay iyo wakhtiga ay dhacdadu dhacday – hadii ay suuragal tahay.
- Su'aalaha ama racfaannada la xiriira diidmada qaxootinmada, laguma diri karo dacwo ahaan, ama hanaanka dacwadda ee aan kor ku sharraxnay.
- Fadlan ogsoonoow in UNHCR ay dacwaddaada u eegi doonto si dhab ah, islamarkaana la ilaalin doono sirtaada, sidoo kale in dacwaddaada si buuxda loo daba gali doono.

**!** DHAMMAAN XIRIIRADA LALA SAMEEYO XAFIISKA DACWAD-OOGAHA **WAA SIR**

# TILMAAMAHA COVID-19

UNHCR iyo hay'adaha la shaqeeya ee xarunta diiwaan-gelinta, waxaa ay u sii hoggaansami doonaan tilmaamaha ay soo rogtay dowladda Liibiya ee looga jawaabayo cudurka COVID-19.

Si loo yareeyo in dad badani ay hal mar isku imaadaan, loona xaqiijiyo in dadku kala durugsanaadaan, waxaa ay hay'addu dhaqan galisay in dadka imaanaya ee loo adeegayaa ay ballan ku imaadaan kaliya. Kaliya dad mucayin ah oo xadidan ayaa la ballamin doonaa maalin kasta si loo xaqiijiyo tilmaamaha caafimaad ee kala durugsanaanta dadka.

**HADII ADIGA AMA XUBIN QOYSKIINA KA MID AH AY KA SOO MUUQDAAN CALAAMADAHA COVID-19,**
Fadlan u hoggaansama tilaamaha qaran ee dowladdu dajisay,
lana xiriira Xarunta Qaranka ee
Xakamaynta Cudurada **(NCDC):**

**1404 / 1415** **@NCDC.LY**

## FAAHFAAHIN KU SAABSAN CIWAANADA HAY'ADDA

**Ciwaanada UNHCR ee Liibiya**

Jidka Sahel Al Jfara, u dhaw El Mashtal Square, Sarraj Area, Taraabolis, Liibya

UN HUB, Benghazi, Libya

@UNHCRTripoli
@UNHCRLibyaInfo
@UNHCR Libya
https://help.unhcr.org/libya

**091 712 7644**

Khadka/taleefanka furan ee khadka badbaada UNHCR

08:30-16:30

Axad ilaa khamiis

**1404**

Tawasul Call Centre | CFM – Khad furan oo la soo wici karo

09:00-23:00

Axad ilaa khamiis

**08:30 - 16:30**

Axad ilaa khamiis – Xafiiska UNHCR